



CHILDREN'S THERAPY CENTER

Celebrate what is. Commit to what can be.

Waan ku salaamay! Inta aan kula sii wadno safarkan ilaa iyo inta looga gudbayo cudur safmar ah, ayaa waxaan doonaynay in aan kula wadaagno qorsheyaasheenna ugu dambeeyay ee loogu talagalay sida aan u sii wadi karno bixinta adeegyada bukaan-eegtada (3-18 sano) ee carruurta iyo qoysaska. Hoos ayaa waxaa ku xusan metalaadda muuqaalka ah ee qorshayaashan oo la socda sharraxaad dheeraad ah.

Bedqabkaaga iyo kan qoyskaaga iyo sidoo kale bedqabka adeeg bixiyeyaasheenna iyo hawladeennada taageerada ayaa weli sii ah mudnaanteenna ugu sarreysa. Qorsheyaasheenna ayaa si dhow ula janqaadaya qorsheyaasha BILOWGA AMAANKA AH/SAFE START ee dowladda. Waa in aynu raacno dhammaan shuruucda CDC, Waaxda Caafimaadka iyo dowladda.



CHILDREN'S
THERAPY CENTER

U dabbaaldeg waxa ah. Ballanqaad waxa ay noqon karto.

Barnaamijka Xarunta



***Adeeyo Meelo Fogfog Laga Bixiyo:** Dhammaan adeegyada ayaa meelo fogfog laga bixiyaa iyada oo loo marayo shirarka fiidiyowga (telehealth) iyo xiriirka telefoonka.

***Qaabka Adeegga Isku-dhafan:** Qoysaska ayaa la siiyaa 2 kulamo bishii oo nooca telehealth ah iyo 2 kulamo oo bukaan-eegta lagu bixiyo. Adeeg-bixiyayaasha ayaa keliya bukaan-eegtada jooga laba maalin toddobaadkii oo jadwal wareegto ah.

***Awoodda Sii Korortay ee Adeegyada Tooska ah iyo Kuwa Isku-dhafan:** Sii-wad bixinta qaabka isku-dhafan. Adeeg-bixiyayaasha ayaa kordhin kara maalmaha bukaan-eegtada waxayna ka dhigi karaan 3 ama 4; qoysas tiro xaddidan ayaa heli kara booqashooyinka adeegga toos ah oo dheeraad ah.

***Adeeg Toos ah:** Qoysaska waxaa ay ku noqon karaan adeegga tooska ah ee toddobaadlaha. Adeeg-bixiyayaasha waxay ku noqon karaan shaqada bukaan-eegtada oo waqti buuxo ah.

Qorshahan waa mid daganeyn wuunna isbeddeli karaa, iyada oo ku xiran dhaqdhaqaaqa fayraska ee bulshooyinka; helitaanka tallaal; daaweyn cusub oo la helo, iwm. Fadlan ogow in aan kula soo socodsiin doono isbeddelo kasta.

Waqtiyadan waa waqtiyo anagga oo dhan nagu adag balse waxaa naga go’an in aan idin taageerno adiga iyo cunugaagaba habka ugu amaansan ee suuragalka ah. Waad ku mahadsan tahay fahamkaaga iyo dulqaadkaaga. Fadlan aan oggaado haddii aad qabto su’aalo dheeraad ah. Waxaad igala soo xiriiri kartaa 253-216-0845 ama jodi@ctckids.org.

Si daacad ah,

Jodi VanVleet, Agaasimaha Barnaamijka Xarunta

Children’s Therapy Center: Adeegyada loogu talagalay 3-18 sano jirada **QABYO-QORAAL**
Adeegyada La Heli Karo waxaa ay la xiriiraan Qorshayaasha Bilowga Amaanka ah ee Degmada King/Pierce

Bilowga Amaanka ah ee Marxkaladda 1-aad	Bilowga Amaanka ah ee Marxkaladda 2-aad	Bilowga Amaanka ah ee Marxkaladda 3-aad	Bilowga Amaanka ah ee Marxkaladda 4-aad	Bilowga Amaanka ah Ka-dib
Adeegyo Meelo Fogfog Laga Bixiyo	Adeegyo Meelo Fogfog Laga Bixiyo	Adeegyo Meelo Fogfog Laga Bixiyo	Adeegyo Meelo Fogfog Laga Bixiyo	Adeegyo Meelo Fogfog Laga Bixiyo
	Qaabka Adeegga Isku-dhafan ee Xaddidan **	Awoodda Sii Korortay ee Adeegyada Tooska ah iyo Kuwa Isku-dhafan***	Adeeg Isku-dhafan	Qaab Isku-dhafan
			Adeeg Toos ah	Adeeg Toos ah

**Qaabka Adeegga Isku-dhafan ee Xaddidan: 2 x bishii oo telehealth/2x bishii oo bukaan-eegtada ah; maalmaha bukaan-eegtada oo xaddidan; adeeg-bixiyeyaasha ayaa keliya bukaan-eegtada jooga 2 maalmood toddobaadkii oo jadwal wareegto ah

***Awoodda Sii Korortay ee Adeegyada Tooska ah iyo Kuwa Isku-dhafan: Weli waxaa la bixiyaa qaabka 2x2 balse adeeg-bixiyeyaasha ayaa kordhin kara maalmaha bukaanka waxayna gaarsiin karaan 3 ama 4; tirada qoysaska xaddidan ayaa kordhin kara adeegga tooska ah ee toddobaadlaha iyada oo ku saleysan baahida jirta.

Marxaladda 4; qoysaska waxay dib u bilaabi karaan adeegga tooska ah ee toddobaadlaha. Adeeg-bixiyeyaasha waxaa ay dib ugu noqon karaan bukaan-eegtada jadwal buuxa ama waxay shaqeyn karaan iyaga oo qorsheynaya isku jirka shaqo meelo fogfog/bukaan-eegtada lagu qabto iyada oo ku xiran culeyska xaddiga shaqada ee adeeg-bixiyeyaasha.

Bilowga Amaanka ah Ka-dib: Dhammaan adeeg-bixiyeyaasha waxay dib u bilaabi doonaan jadwalka shaqada goobta hadba sida loogu baahdo. Hase-yeeshee, adeegyada ayaa weli waxaa lagu bixin karaa qaab isku dhafan ama fogfog ah marka uu qoysku codsado/daaweeye uu ku taliyo.